

Warbixin kugu socota adigaaga waalidka ah

2020-11-30

Haddii ilmagaaga dugsigooda xanaanada ama hoygooda xilli firaaqaha la xiro iyadoo ay sabab u tahay cudur faafid

Waan idin salaamay!

Ujeedada warbixintan waa in adigaaga ah waalidka aad ogaato waxa ansaxa ah haddii dugsiiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha la xiro si loo joojiyo faafida cudurka covid-19.

Degmadu waxay xaq u leedahay inay go'aamiso xiritaanka qayb si loo joojiyo faafida cudurka covid-19. Laga yaabee in adigu aad arintan ku soo aragtay qaybta ilmahaaga/caruurtiinu dhigato. Sababta haddii uu dhaco xiritaan waa faafida cudurka iyo in shaqaale badan ku maqanyihiin xanuun. Go'aanka ku saabsan xiritaan si loo joojiyo faafida cudurka badanaaba wuxuu u dhacaa si dhakhso ah. Tani micnaheedu waa in mar kasta aananu fursad u haysan inaanuwakhti fiican ka hor ku siino macluumaad ka hor intaan go'aankan dhaqan gelin. Haddii dugsiiga xanaanada iyo hoyga xilli firaaqaha la xiri doono waxaad macluumaadka ku saabsan ku heli doontaa dhanka ii-maylka ama telafoonka.

Haddii aad ka shaqayso hawl shaqo oo muhiim u ah bulshada

Haddii aad ka shaqayso hawl shaqo oo muhiim u ah bulshada oo caruur kuu dhigato dugsiiga xanaanada ama iskoolka ilaa iyo ah fasalka 6, waxaa lagugu casuumi doonaa daryeel laga helo qayb kale haddii dugsiiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha loo baahdo in la xiro. Maamulaha iskoolka ayaa ku siinaya macluumaadka ku saabsan dugsiiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha ee la idinku casuumayo inaad boos ka helaysaan wakhtiga qaybtiina caadiga ah xirantahay.

Waa shaqo-bixiyahaaga kuwa qiimeynaya haddii shirkad ama urur ahaan aad ku hawlantihin shaqo muhiim u ah bulshada. Diiwaan-gelinta baahida daryeelka waa la samayn karaa haddii shaqo-bixiyahaagu qiimeeyo in hawshaada shaqo ay lagama maarmaan u tahay in la wado hawl muhiim u ah bulshada.

Adigu waxa keliya ee aad samayn kartaa wargelintaada baahida daryeel haddii dugsiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha la xiro. Maaha suurtagal in ka hor la sii sameeyo wargelinta baahida. Laakiin waad isa sii diyaarin kartaa adigoo ka warhaynaya oo macluumaad ka helaya dugsiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha. Adigu waxaad xitaa weydiin kartaa shaqo-bixiyahaaga haddii adigu aad ka tirsantahay hawl muhiim u ah bulshada haddii aad u aragto in arintani aanay caddayn.

Adigu waxa keliya oo aad xaq u leedahay daryeel haddii aanad daryeel u diyaarin karin qaab kale. Haddii ay jiraan laba waalid oo mid keliya oo idinka mid ah ka qayb-qaato hawl muhiim u ah bulshada markaas waxaa aasaas ah in waalidka kale uu hayo ilmaha.

Haddii ay dhacdo xiritaanka dugsiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha waxaad baahidaada daryeel ka diiwaan gelinaysaa adeega elaktarooniga ah: [Waalidka ka shaqeeya hawl muhiim u ah bulshada - diiwaan geli baahida daryeel xilliga xiritaanka iskoolka degmada, dugsiga xanaanada, hoyga xilli firaaqaha ama hawl kale oo waxbarasho](#)

Adeega elaktarooniga ah waxaa laga helayaa Mina sidor ee degmada boggeeda intarnatka, www.norrkoping.se

Caruurta baahi u qaba taageero gaar ah

Haddii ilmahaagu baahi weyn u qabo taageero waxaa kula soo xiriiri doona shaqaalaha dugsiga xanaanada ama hoyga xilli firaaqaha.

Gunnada marka la hayo ilmo xanuusanaya

Adigu waxaad helaysaa gunnada marka la hayo ilmo xanuusanaya haddii degmadu go'aamiso in la xiro qayb. Warbixin dheeraad ah waxaa laga helayaa Qasnadda Caymiska boggeeda intarnatka, www.forsakringskassan.se

Dhanka norrkoping.se waxaa laga helayaa warbixin dheeraad ah oo ku jiheysan adigaaga caruur u dhigato dugsiga xanaanada iyo iskoolka.

www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola

Waad ku mahadsantahay inaad caawimaad ka geysato in la joojiyo cudur faafiidan!

Salaan diiran
Xafiiska waxbarashada